

#EndFoodWaste

Kaydi \$\$\$ & Yaree Qashinka: FAHAN TAARIKHDA KU QORAN



Taariikhda ku qoran LAMA saabsana badqabka cuntada, laakiin dad badan ayaa sidaan u maleynaaya kadibna way iska tuuraan, cuntadii oo wali fiican:

- Dawladu MA maamusho sumadaha taariikhda*
- Majiraan wax shuruudu ah oo la xariira sida taariikhda looso qoro
- "Use By", "Sell By", "Best if Used By" iyo taariikhaha kale waxaa soo go'aamiya shirkada soosaarta oo ka talisa

* Caanaha foomulaha ee carruurta kaliya ayaa lagu soo qoraa taariikhda gobalka New York.


Inta badan cuntooyinka wali waxay leeyihiin tayo sare waana amaan waqti kadib marka la dhaafdo taariikhda. Tusaale:

- Yoogadka iyo jiiska: Waxaa la isticmaali karaa 7+ maalmood oo kadib taariikhda ku qoran
- Ukunta: Waxaa la isticmaali karaa 3+ asbuuc oo dheeraad ah
- Cuntooyinka qasacadeysan/kujira bokiska: Waxaa la isticmaali karaa 3+ billood oo dheeraad ah

Ka baar "End Food Waste" barta OCRRA.org

NEWMOA
NORTH EAST WASTE MANAGEMENT OFFICIALS' ASSOCIATION
NEWMOA.org

OCRRA
OCRRA.org 



FIKRADO CUSUB

CAGAAR MACAAN OO LA KARIYAY

Isticmaal khudaarta cagaarka ah, sida kale swiss chard, cagaarka collard, cagaarka caleemaha waawayn, ama isbiinaaj:

- Kudar 1-2 qaado oo saliid ah birta wax lagu shiilo oo leh kuleel dhexdhexaad ah
- Kudar basal jarjaran kadibna walaq illaa ay jileec noqonayaan
- Kudar cagaarka, yaree dabka, kadibna walaq illaa ay jileec noqonayaan
- Kudar cusbo iyo basbaas si ay u dhadhamaan - kudar basbaas kale, haddii aad rabto

SAMEE UKUN LA BURBURIYO

Sii 2 ama 3 ukun halkii qofba:

- Ku shub ukunta saxan si aad isku dhexgeliso
- Kudar 1 qaado oo ah saliid birta lagu shiilo oo leh kuleel meel dhexaad ah
- Kudar ukunta
- Kudar khudaar sida barankoodi jarjaran & la kariyay, basbaas, basal ama isbiinaaj
- Waad iska dhaafi kartaa: kudar hilib jarjaran ama la kariyay
- Walaq illaa ukuntu ka bislaato
- Kudar cusbo iyo basbaas si ay u dhadhamaan - kudar basbaas kale, aad rabto
- Waad iska dhaafi kartaa: kudar jiiskaaga aad jeceshahay

Waxaad isku dayi kartaa inaad cuntada sideeda u diyaariso ama waxaad ku dari kartaa maadooyinka aad haysato iyo kuwa aad jeceshahay.

